

Khayraad Sharci

Waxbarashada Sharciga ee uu Isku-duway
Mashruuca Caddaaladda Northwest, Mashruuca
(CLEAR) ee Talo iyo Gudbin (loogu talagalay dadka
dakhliga yar keliya)

1-888-201-1014

www.nwjustice.org

Xarunta Sharciga Haweenka ee Northwest

Khadka Macluumaadka iyo Gudbinta

(206) 621-7691

www.nwwlc.org

Looxada Ururka Gobolka Washington

Si aad u hesho adeegyada gudbinta sharci
ee ka jira degmadaada wac:

800-945-9722

www.wsba.org

Mareegtooyin

Kala xiriir maxkamadaha

www.courts.wa.gov/

Qaybta Taakulaynta Ilmaha

www.dshs.wa.gov/dcs/

Rugaha Gargaarka Sharci iyo Macluumaadka Sharci

wsba.org/atj/contact/legasst.htm

washingtonlawhelp.org

li-mayl

Qaybta Taakulaynta Ilmaha

DCS-CRU@dshs.wa.gov

li-mayl

Waxaa qof (qaraabo, saaxiib ama wakiil sharci ah) soo
waci karaa DCS isaga oo adiga kaa wakiil ah. Waxaan uga
jawaabi karnaa su'aalaha guud qof kasta, laakiin kama hadli
karno faah-faahinada kiis gaar ah oo aan ka ahayn haddii
aynu haysano oggolaanshahaaga qoran.

Wac xafiiska Qaybta Taakulaynta Ilmaha
ee kuugu dhow ama wac 800-442-KIDS
(5437) si aad u oggaatid xafiiska gacanta
ku haya kiiskaaga.

Xafiisyada Qaybta Taakulaynta Ilmaha (DCS)

Everett 800-729-7580
425-438-4800

Kennewick 800-345-9981
509-374-2000

Olympia 800-345-9964
360-664-6900

Seattle 800-526-8658
206-341-7000

Spokane 800-345-9982
509-363-5000

Tacoma 800-345-9976
253-597-3700

Vancouver 800-345-9984
360-696-6100

Wenatchee 800-535-1113
509-886-6800

Yakima 800-441-0859
509-249-6000

Xarumaha Dhexe 800-457-6202
360-664-5000

Barnaamijka Taakulaynta Ilmaha
ee Gobolka Washington



**Ma tahay in aan
bixiyo taakulaynta
ilmaha haddii aan
qaato gargaarka
ay dowladdu
bixiso?**



Washington State
Department of Social
& Health Services

Transforming lives

Waxaa lagugu leeyahay taakulaynta ilmaha xataa marka aadan haysan lacag aad ku bixiso.

Lacag-bixinada Taakulaynta Ilmaha waa in la bixiyaa bil kasta xataa haddii aad qaadato gargaarka ay dowladdu bixiso ee loo yaqaano Gargaarka Aan Joogtada Ahayd ee la siiyo Qoysaska Baahan (TANF), ama Gargaarka Guud sida waayeeelka, indhoolaha, naafada (ABD), Gargaarka Haweenka Uurka leh (PWA) iyo Guryaynta iyo Baahiyada Degdegga ah (HENS).

Haddii aadan awoodin in aad bixiso taakulaynta ilmahaaga, waa lagugu lahaanayaa ilaa aad ka aado shaqo ama aad ka joojiso qaadashada gargaarka. Tani ma caawinayso adiga iyo carruurtaada.

Maxaan sameyn doonaa?

Ka wac Qaybta Taakulaynta Ilmaha (DCS) 800-442-KIDS (5437) ama mid ka mid ah xafiisyadeeda ee ku qoran xagga dambe ee buugyaraha. Kala hadal Sarkaalkaaga Dhaqangelinta Taakulaynta (SEO) wixii ku saabsan deyntaada ka dibna samee qorshe lacag-bixin.

Qaybta (DCS) miyay weerar ku qaadi kartaa lacagta gargaarka dowladda ay isiiso?

Maya. Qaybta (DCS) ma qaadan karto lacagta gargaarka ay dowladda bixiso.

Qaybta (DCS) miyay weerar ku qaadi kartaa mushaarkeyga?

Haa. Qaybta (DCS) waxaa ay qaadan kartaa ilaa 50% ee mushaar ka aad guriga u qaadato haddii aad:

- shaqeysato mushaar ama
- qaadato gargaarka dowladda oo aadna shaqeysato mushaar.

Qaybta (DCS) miyay weerar ku qaadi kartaa lacagaha ku jira koontadeyda bankiga?

Haa. Qaybta (DCS) waxaa ay qaadan kartaa lacagta ku jirta bankiga iyo xisaabaadka kale.

Waxaan ka dalbanaynaa bankiga in uu noo soo diro qaddarka lacagta lagugu leeyahay ama qaddarka lacag-bixinta taakulaynta ilmaha. Waxaad heli kartaa lacagta kale ee ku harta koontadaada maalinta xigta. Haddii aad leedihiin koonto la wadaago oo aadna na tusi karto in koontada ay ku jirto lacagaha ay kasbato xaaskaaga, ma qaadan doono lacagta ay xaaskaagu leedahay. Qaybta (DCS) ma qaadanayso lacagta laga helay TAND ama deeqaha kale ee lacagta caddaanka/kaashka ah.

Qaybta (DCS) weerar kuma qaadi karto mushaarkeyga haddii:

- shaqadaada lagu maalgeliyo lacagta TANF ama
- aad ku qoran tahay barnaamijyo shaqo sida Shaqooyinka Bulshada ama barnaamijka Job Corps.

Maxaa dhacaya goorta aan ku noqdo shaqada?

Soo wac qaybta DCS ka-dibna noo sheeg shaqadaada cusub. Sharciyada gobolka iyo federaalka ayaa innaga doonaya in aannu qaadno ugu yaraan lacag-bixinta taakulayntaada hadda oo lagu daray wax ku saabsan qaddarka hore laguugu lahaa (sidoo kale loo yaqaanno deynta baaqiga kugu ah/ururtay). Mar kasta oo lacag-bixinadu aannu la sameyn oo taakulaynta ilmo hore lagugu leeyahay, waxaan:

- ceshanaynaa 50% ee mushaarkeyga
- joojin/laali doonaa shatigaaga daraawalka, iyo
- qaadi doonaa tallaabooyin kale (anaga oo aan kuu sheegin ka hor inta aannu sameyn).

Waxaan ogolaan karnaa wax ka yar taakulaynta hadda muddo waqti oo gaar ah si looga fogaado joojinta/laalidda shatigaaga daraawalka.



Sidee ayay qaybta DCS ii caawin kartaa?

Guddiga dhageysiga ama shirka ayaa hoos u dhigi kara deynta taakulaynta ilmaha ee uu gobolka kugu leeyahay.

Haddii aad leedahay amar maamul oo ku talagal ah, waxaa lagu ogolaan karaa in aad weyddiisato dhageysi goor dambe ah.

Haddii aad haysato amar maxkamadeed ama amar maamul, waxaad weyddiisan kartaa guddiga shirka.

Haddii aadan awoodin in aad bixiso deynta uu gobolka kugu leeyahay iyada oo sabab u ah dhibaato aad u daran, waxaannu tixgelin doonaa ikhtiyaaro dib-u-bixin.

Miyay beddelidda (wax-ka-beddelidda) amarka taakulaynta ilmaheya i caawinaysaa?

Lacag-bixinta taakulaynta ilmahaaga waa in lagu dhigo amarkaaga si ay ugu turjunto awoodda aad hadda u leedahay in aad bixiso.

Wax-ka-beddelidda amarka taakulaynta ilmaha waa habka qaddarka lacag-bixinta taakulaynta ilmaha ee hadda loo beddelo.

Ma beddelayso qaddarka deymaha taakulaynta ilmaha ee aan hore loo bixin.

Uma dhaceysa si otomaatik ah – waa in aad weyddiisato, oo aad nala shaqeysa si aad uga dhigto mid dhacda. Waxaannu la shaqeynaa Garsoorayaal Sharci Maamul iyo Dacwad-oogayaasha Xeer-ilaalinta si aannu wax uga beddelno amarada. Waxaa ay qaadan kartaa bilo badan in wax laga beddelo amar.

Waxaad sidoo kale wax uga beddeli kartaa amarka taakulaynta ilmahaaga maxkamadda adiga oo la xiriiraya qareen ama Fududeeyaha Maxkamadda Sharciga Qoyska.

Fududeedayaasha waxaa laga helaa xafiisyada xogheynta ee degmada. Fududeeyaha waxaa uu bixiyaa foomam iyo macluumaad, oo bilaash ah kuna saabsan hannaanka “loogu talagalay qofka” balse kuma siin karo talo sharci. Qaadista tallaabada maxkamadda “loogu talagalay qofka” waxaa loola jeedaa in aad adiga naftaada sameynayso.

Sidee ayay wax-ka-beddelista u shaqeysaa?

Dhib ma laha muddada ay xaaladaadu isbedeshay, wax-ka-beddelista waa “wax la filayo” keliya; taas macanaheedu waa in aannu beddeli karin qaddarka lacag-bixinadii hore, keliya lacag-bixinada mustaqbalka.